



DIB U SOO CELINTA XIRIIRKA QOYSKA

Isku dayida in la helo dadka ka dibna lala xiriiriyo qaraabadda waxay ICRC, Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS), shabakadda Jimciyad-Qarameedyada Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas, mutadawiciinta gobolka iyo dunida oo dhan ku tahay dhib weyn.

SOOMAALIYA: QOF KASTA AYAAN U JOOGNAA GOOB KASTA



Cabdulkadir Xuseen (gacmaha sare u taagaya), xoghayaha SRCS xafiiska laanta Xuddur oo booqanaayaan hawlaha dhismayaasha socdaan, waxaa la socda mutadawiciinta.



Halwo dhisme ka socota xafiiska SRCS laanta Xuddur. Dayactirka waxaa taageeray ICRC.



Isku-duwaha warfaafinta Pedram Yazdi oo isu diyaarinaaya in sawir ka qaado dhisme dayactir ka socda SRCS xafiiska laanta Xuddur.

Maanta waa Maalinta Adduunka ee Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas oo la qabto 8-da Maajo, waa xaflad sanadle ah oo la xusaayo tabarruca Dhaqdhaqaaqa Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas. Soomaaliya waa dal burburiyey tobanaan sano oo socday dagaal sokeeye. Waxay bixisaa fursad ka turjumeysa taariikh iskaashi dhow oo ka dhaxeeya Guddiga Caalamiga Laanqeyrta Cas (ICRC) iyo Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) oo wadaagaan taageerida dadka ay saameeyeen iska horimaadyada hubeysan iyo waxyeelada qalafsan ee cimilada.

Iyadoo taageero ka heleyso ICRC-da, SRCS waxay dhowaan dhammeysay dayactirka xafiiskeeda laanta Xuddur, Gobolka Bakool.

Furitaanka dhismaha dib loo habeeyey oo dhacday 4-ta Maajo 2016 waxay muujineysa fursad kuwa hawsha isla wada in gobolka dib ugu hanteen boos aadminimo goobtaas oo muddo dheer aheyd meel la geli Karin.



Daniel O'Malley (bidix), Ku xigeenka Madaxa Ergada iyo Maxamed Yuusuf, Madaxweynaha SRCS ayaa si rasmi ah u furay xafiiska cusub



Sawirk koox ka kooban ICRC iyo SRCS oo ay la jiraan mutadawiciinta markii la furayey dhismayaasha cusub.



Madaxweynaha SRCS, Yuusuf Xasan Maxamed

Wada shaqeynta labada dhinacba waxtar u leh oo u dhaxeeyo ICRC iyo SRCS waxay ka soo bilaabaneyso todobaatameeyadii oo ku saleysan mabaad'ida asaasiga ah isku mid ah kaa oo haga habka aan u waajahno aadminimada.


Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) waxay ku faraxsantahay u dhawaanshaha ay la leedahay bulshooyinka meel kasta Soomaaliya ay ka joogaan, iyadoo ay leedahay shabakad ballaaran 19 laamood iyo ku dhowaad 130 laamo hoosaad guud ahaan dalka iyo in ka badan 4,600 mutadawiciin. Tani waxay muhim u tahay fahamka baahiyaha qoysaska nugul iyo xaqiijinta waxqabad waafaqsan waqtiga.

"Aan u sii dhowaano bulshada si aan ugu guuleysano teegeradooda

iyo aqbalaadooda, sidaa waxaa yiri madaxweynaha SRCS, Mudane Yuusuf Xasan Maxamed intii lagu guda jiray xaflladii furitaanka Laanta SRCS Xuddur." Wuxuuna raaciyey, "Laanta Xuddur waa mid ka mid ah tusaalooyinka mashaariicda la taaban karo oo la hirgeliyey iyadoo taageero laga helay ICRC."

ICRC waxay la timid waayo-aragnimo caalami ah iyo khibrad soo jirtay 150 sano tallaabo bani'aadamnimo. Waxayna ka mid yihiin taageero maadi ah iyo mid tababar si loo taageero dadka dhibaataada saameysay. Mawduuca sanadkan ee Maalinta Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas: 'Qof Kasta Ayaan U Joognaa Goob Kasta' waxay muujineysaa caawinteen la-hawlgalayaal dhaqdhaqaa ahaan ka jawaabida dhibaatooyinka Soomaaliya iyo dunida

hawl taas oo ah arrin aad uga baaxad weyn hawl kasta aadminimo.



Si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan ICRC-da Soomaaliya booqo www.blogs.icrc.org/somalia/so

Email: sok_somaliblog_services@icrc.org

Everywhere
for everyone.



8 MAY 2016 - World Red Cross Red Crescent Day

ICRC

Instagram
@icrc_somalia